

Caddaynta Deganaanshaha: Isdiiwaangelinta Maalinta Doorashada

Aqoonsiga oo leh Magaca Hadda Iyo Ciwaanka

- Shatiga darawalnimada Minnesota oo ansax ah, ogolaanshaha bartaha ama aqoonsiga; ama rasiidka mid ka mid ah kuwan.
- Aqoonsiga qabaa'ilka oo wata magaca, cinwaanka, sawir iyo saxiixa.

Aqoonsiga sawirka leh iyo dukumeenti wata magaca iyo cinwaanka hadda

Aqoonsiga sawirka leh ee la ansixiyay Mid dooro. Aqoonsigu wuxuu noqon karaa mid xiligiisii dhacay

- Shatiga darawalnimada, aqoonsiga gobolka ama oggolaanshaha baabuur wadista ee uu bixiyo gobol kasta
- Baasaboorka Maraykanka
- Aqoonsiga ciidamada ama howlgabka ciidamada
- Aqoonsiga qabaa'ilka oo wata magaca, saxiixa iyo sawir
- Aqoonsiga Jaamacadda, kulliyadda ama kulliyadda farsamada ee Minnesota
- Aqoonsiga dugsiya sare ee Minnesota

Dokumamentiyada la aqoonsanyahay Mid dooro. Waxa lagu tusi karaa qalabka elegtarooniga ahaan.

- Biilasha, akoonka ama bayaanka bilowga adeega lagaa rabo ama ku taariikhaysan 30 maalmood gudahooda ee doorashada ee:
 - Telefoonka, TV ama internetka
 - Qashinka adag, bulaacada, korontada, gaaska ama biyaha
 - Kaarka baniga ama kaarka daynta
 - Kirada ama deynta guriga
- Heshiiska kirada ee deeganaanshaha ama kirada oo ansax ah ilaa maalinta doorashada
- Bayaanka kharashka ardayga ee hadda

Codeeyaha Diiwaangashan oo Xaqiijin kara Ciwaankaaga

Codbixiye ka diiwaangashan xaafaddaada ayaa kuu raaci kara goobta codbixinta si uu u saxiixo dhaar xaqiijinaysa ciwaankaaga. Tan waxaa loo yaqaan 'vouching' (dammaanad). Codbixiyaha diiwaangashan wuxuu dammaanad qaadi karaa ilaa siddeed codbixiye. Ma dammaanad qaadi kartid dadka kale haddii uu qof ku dammaanad qaaday.

Aqoonsiga Ardayga Kulliyada oo wata Liiska Dadka Degan Guryaha

Kulliyadaha iyo jaamacaduhu waxay u soo diraan saraakiisha doorashada liiska ardayda guryaha degan. Haddii aad ku jirto liiska, tus aqoonsiga sawirka leh ee jaamacadda si aad u dhammaystirto isdiiwaangelintaada.

Isdiiwaangelin sax ah oo isla xaafada deegaanka ah

Haddii aad ka diiwaangashantahay xaafada laakiin aad bedeshay magaca ama aad guurtay isla xaafada dhexdeeda uun, waxaad u baahan tahay oo kaliya inaad u sheegto garsooraha doorashada magacaagi hore ama cinwaankaagi hore.

Ogeysiiska Diiwaangelin Daahday

Haddii aad isudiwaangeliso inaad codayso 20 maalmood gudahooda ee maalinta doorashada, waxa laga yaabaa in aad boostada ku hesho Ogeysiiska Diiwaangelinta Daahday. Soo qaado oo u isticmaal caddayntaada deganaanshaha si aad isudiwaangeliso.

Qofka Shaqaalaha ah ee Xarunta Xanaanada Deganaanshaha

Haddii aad ku nooshahay xarun xanaano la degganyahay, qof shaqaale ah ayaa kuu raaci kara goobta codbixinta si uu u xaqiijiyo ciwaankaaga. Tan waxaa loo yaqaan 'vouching' (dammaanad). Qofka shaqaalaha ahi waxa uu dammaanad qaadi karaa dhammaan codbixiyayaasha xaqa u leh ee ku nool xarunta.



“EEG AQOONSIGA” ee ku jirta liiska

Muuji caddaynta deganaanshaha

Aqoonsiga oo leh Magaca Hadda Iyo Cinwaanka

- Shatiga darawalnimada Minnesota oo ansax ah, ogolaanshaha bartaha ama aqoonsiga; ama rasiidka mid ka mid ah kuwan.
- Aqoonsiga qabaa'ilka oo wata magaca, cinwaanka, sawir iyo saxiixa.

Aqoonsiga sawirka leh iyo dukumeenti wata magaca iyo cinwaanka hadda

Aqoonsiga sawirka leh ee la ansixiyay Mid dooro) Aqoonsigu wuxuu noqon karaa mid xiligiisii dhacay

- Shatiga darawalnimada, aqoonsiga gobolka ama oggolaanshaha baabuur wadista ee uu bixiyo gobol kasta
- Baasaboorka Maraykanka
- Aqoonsiga ciidamada ama howlgabka ciidamada ee Maraykanka
- Aqoonsiga qabaa'ilka oo wata magaca, saxiixa iyo sawir
- Aqoonsiga Jaamacadda, kulliyadda ama kulliyadda farsamada ee Minnesota
- Aqoonsiga dugsiya sare ee Minnesota

Dokumamentiyada la aqoonsanyahay Mid dooro) Waxa lagu tusi karaa qalabka elektarooniga ahaan.

- Biilasha, akoonka ama bayaanka bilowga adeega lagaa rabo ama ku taariikhaysan 30 maalmood gudahooda ee doorashada ee:
 - Telefoonka, TV ama internetka
 - Qashinka adag, bulaacada, korontada, gaaska ama biyaha
 - Baniga ama kaarka daynta
 - Kirada ama deynta guriga
- Heshiiska kirada ee deeganaanshaha ama kirada oo ansax ah ilaa maalinta doorashada
- Bayaanka kharashka ardayga ee hadda

Codeeyaha Diiwaangashan oo Xaqiijin kara Ciwaankaaga

Codbixiye ka diiwaangashan xaafaddaada ayaa kuu raaci kara goobta codbixinta si uu u saxiixo dhaar xaqiijinaysa ciwaankaaga. Tan waxaa loo yaqaan 'vouching' (dammaanad). Codbixiyaha diiwaangashan wuxuu dammaanad qaadi karaa ilaa siddeed codbixiye. Ma dammaanad qaadi kartid dadka kale haddii uu qof ku dammaanad qaaday.

Aqoonsiga Ardayga Kulliyada oo wata Liiska Dadka Degan Guryaha

Kulliyadaha iyo jaamacaduhu waxay u soo diraan saraakiisha doorashada liiska ardayda guryaha degan. Haddii aad ku jirto liiska, tus aqoonsiga sawirka leh ee jaamacadda si aad u dhammaystirto isdiiwaangelintaada.

Isdiiwaangelin sax ah oo isla xaafada deegaanka ah

Haddii aad ka diiwaangashantahay xaafada laakiin aad bedeshay magaca ama aad guurtay isla xaafada dhexdeeda uun, waxaad u baahan tahay oo kaliya inaad u sheegto garsooraha doorashada magacaagi hore ama cinwaankaagi hore.

Ogeysiiska Diiwaangelin Daahday

Haddii aad isudiwaangeliso inaad codayso 20 maalmood gudahooda ee maalinta doorashada, waxa laga yaabaa in aad boostada ku hesho Ogeysiiska Diiwaangelinta Daahday . Soo qaado oo u isticmaal caddayntaada deganaanshaha si aad isudiwaangeliso.

Qofka Shaqaalaha ah ee Xarunta Xanaanada Deganaanshaha

Haddii aad ku nooshahay xarun xanaano la degganyahay, qof shaqaale ah ayaa kuu raaci kara goobta codbixinta si uu u xaqiijiyo ciwaankaaga. Tan waxaa loo yaqaan 'vouching' (dammaanad). Qofka shaqaalaha ahi waxa uu dammaanad qaadi karaa dhammaan codbixiyayaasha xaqa u leh ee ku nool xarunta.



Xeerka Xuquuqda Codbixiyaha

Dhammaan dadka deggan gobolkan ee buuxiyey shuruudaha u qalmitaanka codbixinta federaalka:

1. Waxa aad xaq u leedahay in aad shaqada uga maqnaato ujeedada in aad ka soo codayso doorashada gobol, federaal ama doorasho si joogto ah loo sii qorsheeyey iyada oo aan la dhimin mushaharkaaga, fasaxaaga shakhsi ahaaneed, ama wakhtiga fasaxa maalinta doorashada wakhtiga lagama maarmaanka u ah in aad ku tagto goobtaada codbixinta, in aad codkaaga dhiibato, oo aad ku soo noqoto shaqada.
2. Haddii aad saf ugu jirto goobtaada codbixinta wakhti uun kahor 8:00 pm, waxaad xaq u leedahay inaad codayso.
3. Haddii aad keeni karto caddaynta deganaanshaha ee loo baahanyahay, waxaad xaq u leedahay inaad isu diwaangeliso codbixinta iyo inaad codayso maalinta doorashada.
4. Haddii aadan awoodin inaad ku saxiixdo magacaaga, waxaad xaq u leedahay inaad afka ugu caddayso aqoonsigaga garsooraha doorashada iyo inaad u sheegto qof kale inuu magacaaga kuugu saxiixo.
5. Waxaad xaq u leedahay inaad codsato gargaar khaas ah marka aad codaynayso.
6. Haddii aad u baahantahay gargaar, waxaa laga yaabaa in uu kugu weheliyo goobta codbixinta qof aad dooratay, marka laga reebo wakiilka loo shaqeeyahaaga ama ururkaaga.
7. Waxaad xaq u leedahay inaad keento carruurtaada yar goobta doorashada iyo goobta codbixinta.
8. Waxaad xaq u leedahay inaad codayso haddii aan hadda u xabbisnayn dembi culus.
9. Haddii aad ku jirto mas'uul lagaa yahay, waxaad xaq u leedahay inaad codayso, aan ka ahayn amarka maxkamad haddii aan lagaagala noqon xaqaaga codbixinta.
10. Waxaad xaq u leedahay inaad codayso iyadoon qofna goobta codbixinta isku dayeynin inuu saameyn ku yeesho codkaaga.
11. Haddii aad khalado ama aad hallayso warqadda codbixinta kahor intaan la gudbin, waxaad xaq u leedahay inaad hesho warqad beddel ah oo aad ku codayso.
12. Waxaad xaq u leedahay inaad cabasho qoraal ah ka xarayso goobtaada codbixinta haddii aadan ku qanacsanayn habka doorashada loo maamulayo.
13. Waxa aad xaq u leedahay in aad muunada codbixinta la gasho goobta codbixinta.
14. Waxa aad xaq u leedahay in aad u sii qaadato koobiga Xeerka Xuquuqda Codbixiyahan qolka codaynta.



Ogeysiis ku socda Codbixiyayaasha Doorashada Hordhaca ah

- Doorashada Hordhaca ah ee Magacaabista Musharaxa Madaxweynaha (PNP) waxa ay u ogolaataa dadka reer Minnesota in ay ka qayb qaataan doorashada musharaxa xisbi siyaasadeed ee weyn ee u sharaxan Madaxweynaha Maraykanka. Doorashadan hordhaca ah waxay beddeshay “codbixintii doorashada rabitaanka” (straw poll) ee loogu codayn jiray madaxweynaha shirarkii xisbiga ee xilligii hore.
- Codbixiyayaasha Doorashada magacaabista musharaxa madaxweynuhu waa inay xaq u yeeshaan inay ka codeeyaan Gobolka Minnesota maalinta PNP (Doorashada Magacaabista Musharaxa Madaxweynaha).
- Xisbi kasta oo weyni wuxuu lahaan doonaa liiska codbixinta oo u gaar ah oo ay ku qoran yihiin oo keliya murashaxiinta xisbiga ee u taagan jagada Madaxweynaha iyo haddii xisbigu doorto, kuwa aan xisbi go'aansan ama kuwa gacanta lagu qorayo.
- Natijoooyinka doorashada hordhaca ah ee magacaabista musharaxa madaxweynaha waa in ay raacaan qoondaynta ergooyinka xisbiyada siyaasadeed ee Minnesota.
- Codaynta kahor, sharciga doorashadu waxa uu dhigayaa in aad doorato warqadda codbixinta ee xisbiyada siyaasadeed ee aad rabto. Haddii aad diido inaad doorato hal xisbi, ma codayn kartid.
- Xisbiga siyaasadeed ee aad doorbidaysaa waa qarsoodi, marka laga reebo in uu heli karo guddoomiyaha xisbiga siyaasadeed ee weyn ee aad doorato.



Sida loo codeeyo

1. Dhammaan codbixiyaashu waa in ay diwaangashanyihiin.

- Haddii aad hore ugu diwaan gashanayd inaad codayso, si toos ah u gal miiska diiwaanka.
- Haddii aad u baahantahay inaad isdiiwaangeliso ama aad cusboonaysiiso diiwaangelintaada, aad miiska diwaangelinta codbixiyayaasha. Halkaa waxa aad ku buuxin doontaa arjiga diiwaangelinta codbixiyayaasha oo aad ku muujin doontaa caddaynta deganaanshaha.


2. Soo gal oo qaado rasiidka codbixiyaha.

3. U gudub miiska codbixinta oo u dhiib rasiidka codbixiyaha. Waxaad heli doontaa tilmaamo ku saabsan sida loo calaamadiyo warqadda codbixinta.

4. Tag qolka lagu codbixiyo oo faaruq ah.

5. Ku calaamadee codadkaaga mid ka mid ah siyaabaha soo socda:

Warqadda Codbixinta



Buuxi goobada ku xigta musharaxa aad dooratay.

Calaamadeeyahay codbixinta



Isticmaal caawimada calaamadaynta warqada codbixinta

Weydiiso gargaar haddii aad u baahato.

6. Haddii aad khalad samayso, weydiiso garsooraha doorashada warqadda codbixinta oo cusub.

7. Ku rid warqadaada codbixinta sanduuqa codbixinta. Kadibna isla markiiba ka bax goobta codbixinta.

